

Miisaaniyadda 2023: Nabadgelyada dadka, bulshada Alberta

Feb. 28, 2023

Miisaaniyadda 2023 waxay sare u qaadaysaa nabadgelyada iyo bed-qabka dadka Alberta iyada oo la kobcinayo adeegyada booliska, iyo fursadaha ku beegan soo kabashada caafimaadka dhimirka iyo daaweynta maandooriyaha.

Miisaaniyadda ayaa u qoondaysay \$709 milyan amniga dadweynaha 2023-24, taas oo ka dhigan koror dhan \$84 oo dheeraad ka ah miisaanyaddii sanadkii hore. Arrintan ayaa wax ku kordhinaysa booliska si magaalooyinku ula tacaalaan dembiyada.

“Maalgelintan ayaa dadka degaanku kula iman doonaan xal lagu xaqiijiyo bed-qabka dadka reer Alberta iyo qoysaskooda,” ayuu yiri Mike Ellis, Wasiirka Amniga Dadweynaha iyo Adeegga Gurmada ee dowladda.

Maalgelin dhan \$94 milyan ayaa 2023-24 soo kordhin doonta adeegyo iyo goobo wax looga qabto dhibaataada maandooriyaha, iyada oo diiradda gaar loo saari doono Edmonton iyo Calgary.

12.5 milyan oo kale ayaa 2023-24 lagu ballaarin doonaa daaweynta maxaabiista si looga caawiyo maxaabiista in ay soo kabtaan. Ujeeddadu waa in la yareeyo dembiyada ku noqnoqshada ah bulshadana la nabadgeliyo iyada oo la garowsanayo in caafimaadka dhimirka iyo maandooriyuhu ay yihiin xaalado u baahan daryeel caafimaad.

Iyadana, \$20 milyan ayaa saddexda sano ee soo socota lagu ilaalin doonaa laguna caawinayaa dadka ka badbaaday ama ku waxyeelloobay ka ganacsiga dadka, iyada oo sare loo qaadayo sidii ay u heli lahaayeen adeegyada ay gaarka ugu baahan yihiin. Xafiiska Alberta ee La Dagaallanka Ka Ganacsiga Dadka ayaa isna la abuuri doonaa.

Macluumaad la xiriira

[Alberta.ca/Budget](https://alberta.ca/Budget)

Warbaahinta

Charlotte Taillon
charlotte.taillon@gov.ab.ca
780-932-5381
Xoghayaha Saxaafadda
Guddiga Maaliyadda & Lacagta



War faafin

“Miisaaniyadda 2023 waxa ay inaga caawinaysaa in aan dhisno bulsho bedqabta oo leh adeegyo boolis oo xooggan, adeegyo bulsho iyo gurmada degdegga ah,” ayuu yiri Travis Toews, Wasiirka Maaliyadda ee Dowladda Alberta.